JAMHUURIYADA SOMALILAND

GOLAHA WAKIILADA

WARBIXINTA WADA TASHIGA ARIMAHA DEEGAANKA EE GOBOLKA AWDAL

-Hargeisa(SHOR) taariikhdu markay ahayd 20/03/2012 waxaa kormeer balaadhan ku galaa bixiyey gobolka Awdal koox ka tirsan Xildhibaanada Golaha Wakiilada JSL oo ay horseed ka ahayd Gudida Deegaanka iyo Khayraadka dabiiciga ah ee Golaha Wakiilada laakiin ay

wehelinayeen xildhibaano kale oo ka tirsan gudiyada kale , xildhibaanadan oo lagu magacaabi karo ama loo bixin karo (Kooxda Aragti wadaagta Deegaanka) ama (Green Cocas Team) kuwaas oo aragti midaysan ka leh deegaanka iyo daryeelkiisa ,kormeerkan kooxdan xildhibaanada ah ee gobolka Awdal ayaa wuxuu ku saabsanaa inay xog buuxda oo deegaanka dhabta ah ka turjumaysa kasoo uruuriyaan inta badan deegaanka Gobolka Awdal iyaga oo soo maray in ku dhow Toban magaalo , waxaana ay tani salka ku haysaa iyaga oo xildhibaanadani ku gudo jira sadex Xeer oo dhamaantood ku saabsan ama khuseeya deegaanka iyo daryeelkiisa, waxaana kormeerkan xildhibaanada u fududaysay Hay'ada **IRI** iyada oo u ka taageertay in xildhibaanadu socdaalkan u baxaan.

sadexdaa Xeer ayaa waxa ay kala yihiin:

1. National Environment Ac t (Xeerka Guud Ee Deegaanka)
2. Solid Waste Management Act and (Xeerka Maaraynta Qashinka)
3. Wildlife and Forestry Act (Xeerka Kaymaha iyo Duur joogta)

Hadaba intii xildhibaanadu ay ku gudo jireen Kormeerkoodan xaqiiqo raadinta deegaanka ah waxaa ay waraysiyo badan kala yeesheen arimaha deegaanka ah dadka Xoolo dhaqatada ah, Beeraleyda iyo dadka tuulooyinkaba waxaanay wax ka weydiinayeen su'aalo ku saabsan deegaanka gaar'ahaan sida Dhuxusha,Dhirta la garaacay iyo nabaad guurka carada.

Waxaanay dhamaan waraysiyadaas kala soo baxayeen nuxur ay ku dabakhaan xeerarka ay samayndoonaan ee guud ahaantood ku saabsan deegaanka , hadaba hadaan wax ka taa taabano qaarkamida hadaladii dadka deegaankaasi ka yidhaahdeen nabaad-guurka dhulka waxaa ka mida ahaa deegaanka lagu magacaabo CALI XAYDH mid kamid ah dadka ku nool oo lagu magacaabo Maxamed Cumar Cali ayaa wuxuu ku war bixiyey in 700 (todoba boqol oo dhalinyaro) bilaa camal ahi ay yihiin dhuxulaysato kuwaas oo maalintii jara in kabadan 700 (todoba boqol oo geed) waxaana hadaladiisii kamid ahaa:

“aniga magacaygu waa Maxamed Cumar Cali deegaanka CALI XAYDH na waan ka tirsanahay

xaga Dhuxusha hadaan kaaga waramo anigu ninka iib geynjirey ayaan ahay Boorame ilaa Hargeysana Dhuxusha geynjirey waxaa dhacday inaan mar diiwaan-geliyey dadka dhuxusha shida iyo tiradooda iyo maalintii inta geed ee ay jaraan waxaa Dhuxusha ka shaqeeya 700 (todoba boqol oo inan) ama xoolohoodii ha abaaroobaan ama dano kaleba ha yeeshaan markaa maalintii inta geed ee go’da ee Galool ah (nooca geedka Galoolka loo yaqaan) ilaa 900 boqol oo geed markaa hadaan laga soo gaadhin oo aan dhalinyaradaa shaqo abuur loo samayn ama ciidanka ha qorto ama Hay’adaha ha qorto waxaana dhalinyaradan ku kaliifey inay dhirta shidaan waa Abaarta oo dadbaan waxkaleba haysan xataa hadii roob da’o lama deynaayo waayo waa la caadeystey ,dhalinyaradii wax ay ka shaeeyaan ma hayaan waayo camalbaan jirinba”

Kaasina waxa uu ahaa mid kamid ah dadka ku nool deegaanka CALI XAYDH oo Xildhibaanadu ay halkaasi waraysi kula yeesheen .

Hadaba kooxdan xildhibaanada ee xaqiiqo raadiska deegaanka gaar ahaan Gobolka Awdal waxaa ay socdaalkoodan kusoo mareen deegaano badan oo kala duwan kuwaas oo ay dhamaantood cid ka waraysanayeen xaalada deegaanka is habeenimadii Arbacadu soo geleysey waxaa ay xildhibaanadu u hoyden Degmada lagu magacaabo BOON ee ka tirsan deegaanka Awdal ama Gobolka Awdal halkaas oo ay kula kulmeen wax garadka, Odayaasha iyo xoolo dhaqatada deegaanka BOON dhamaantoodna ay ka waraysteen xaalade deegaanku ku suganyahay iyo guud ahaan nolosha dadka halkaas ku sugan.

Intaas kadib waxaa xildhibaanadu ay socdaalkooda usoo wadeen dhinaca Magaalo madaxda Gobolka Awdal ee Boorama halkaas oo ay isla gelinkii danbe ee 21/03/2012 ku yimaadeen magaalo madaxda Gobolka Awdal.

Hadaba waxaa magaalo madaxda Gobolka Awdal ku sugnaa oo halkaa ku sugaayey Xildhibaanada madaxda iyo maamulka Hay'ada hawlgalkan xildhibaanada ka taageereysey ee lagu magacaabo IRI waxaana bulshada qaybeheeda kala duwan usii qabteen Siminaar ku saabsan Xeerarkan kaas oo bilaabmay Arbacadii 21/03/2012 dhamaadayna Khamiistii ,waxaana halkaas lagu sii diyaariyey xildhibaanada aqoonyahano dhinaca deegaanka ah kuwaas oo sii akhriyey siina falanqeeyey sadexdan xeer si ay waxna ugusoo daraan waxna uga bedelaan xeerarkan xildhibaanadana su'aalo uga weydiiyaan.

Waxaana halkaas kasoo baxay falanqayn balaadhan in lagu sameeyo xeerarkan bulshaduna ay ka dhiibato rayigeeda aadna ay ugu farxaan in wax laga weydiiyo Xeerarkii deegaankooda lagu dhaqi lahaa,halkaasna xildhibaanadu waxaa ay kusoo qaateen talooyinkii dadweynaha reer Awdal ee Xeerarkan ku saabsanaa.

Waxaa xusid mudan in kooxdan xildhibaanada ah iyo Hay'ada IRI oo iyadu hawshan u fududaynaysa xildhibaanada ay soo mari doonaan dhamaan Gobolada ay ka koobantahay JSL sida Saaxil,Togdheer, Sanaag ,Maroodi-jeex,Sool iyo Awdal oo socdaalkiisu u soo dhamaaday waxaanay dhamaan Goboladaa kasoo samayn doonaan baadhitaan xaga deegaanka ah si ay ugu dabakhaan xeerarkan ay samaynayaan.

Magacyada Xildhibaanada:

1. Xil: Ibraahim Axmed Raygal
2. Xil:Axmed Barkhad Obsiiye
3. Xil: C/qaadir Jaamac Xaamud
4. Xil: Mahdi Maxamed C/laahi

Diyaariye:

Mubaarik Faarax Warsame

Xoghayn Golaha Wakiilada JSL